

## Walaal waalid/ daryeele

### Helitaan deeqeed----- Caasumaad ah dalbo

Qoowskii lacagta soo gashaa haddii eey yartahay waxeey xaq u leeyahiin in Doowladu ka caawiso oo eey siiso kompuyuutar iyo internet lacagla'aan ah haadii qoowskaasu ku noolyahay Iglan.

Si aad u codsatid deeqdaan, waa in waalidka caruurta haayaa mas'uul uu ka yahay lana noolyahay.

....Caruurtuna waa in eey dhigtaan iskuulka fasalka 3aad ilaa iyo 9aad, (da'dooduna waa in u dhaxeysaa 7 ilaa 14 jir).

....Waa in aadan deeq kompuyuutar ah weligaa ka helin dad ama deeq bixin ka helin Doowlada deeqdaan bixineysa.

... Qoowska inmihiisu waa in xaq u leeyihiin cuntada iskuulka lacagla'aanta lagu siiyo oo welibana warqad cadeeyneysa ka haysataa Doowlada. (**free school meal**)

Xaq uma lihid haddii aad qaadatid lacagta shaqaalaha caaruurta qaba lagu kabo. (family working tax credit).

Si aad u heshid foomka deeqda ee la buuxinaayo, **waa in lasoo xiriirtaa deeqbixiyaashya Taleefankuna waa 03332001004** (laga bilaabo Isniinta ilaa iyo Jimcaha 8da subaxnimo ilaa iyo 8da habeenkii, Sebtiga 8da subaxnimo ilaa 1da galabtii).

Taleefanka ayaa laguugu sheegayaa haddii aad xaq u leedahay , haddii aad ku guuleysatid foomkaa lagu soo dirayaa si aad u buuxusid, waana lagu sheegayaa wax kasta oo aad u baahantahay inaad u gaatid, waxa kale oo lagu sheegayaa meelaha lagaa rabo in aad buuxisid, baqshad lacagla'aan ahna waa lagu soo raacinayaa foomka.

Haddii aad ku guuleysatid deeqdaan, waxaa lagu ogolaanayaa mid ka mid ah baakeyjyadaa hoos ku xusan.

- 1- baakeyj buuxda( kompuyuutar lacagla'aan ah iyo hal (1)sano oo lacagla'aan internetka laguugu soo deeynaayo iyo weliba caawimaad lagaa siinaayo).
- 2- Kompuyuutar lacagla'aan ah caawimaadna lagaa siinaayo oo keli ah
- 3- Hal (1) sano oo internetka lacagla'aan laguugu soo deeynaayo oo keli ah.

Waa nassiib aad u wanaagsan , waxaana ku rajo weynahay in deeqdaas ku guuleysatid.

Iskuulka cunugaadu dhigto waxaa ka heli kartaa warar kale oo dheeraad ah adigoo weli lagu turjumaayo, haddii aad rabtid in ka qeyb geshid, fadlan weeydii iskuulka.

Mahadsanid.